Check-out the ICRC website in Somali:
http://www.icrc.org/eng/home/languages/somali/index.jsp

WARSIDE

ICRC SOMALIA DELEGATION ISSUE NO.2 JANUARY 2013

GARGAAR

SOOMAALIYA: SOOCELINTA XIRIIRKA QOYSASKA DAGAALKU KALA GEEYEY

Kadib labaatan sano oo colaad ah, tobanaan kun oo Soomaali ah ayaa ka go'ay qoysaskoodii. Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) ee Soomaaliya, waxay gacan ka geysataa dib u mideynta qoysaskan ayadoo la kaashanaysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed, iyo ururrada kale ee Laanqayrta iyo Bisha Cas ee dunida.

Raadiyaha ayaa weli ah habka ugu fudud ee ay dadku ku xiriiri karaan dalka Soomaaliya. Xaashi ayaan kula kulmay Muqdishow; wuxuu waayey qaab uu ula xiriiro xubnaha qoyskiisa- walaalihiisa iyo xididkiisii.

Toddobaad kasta ICRCdu waxay Qaybta Af Soomaaliga ee BBCda u gudbisaa 125 magac oo dadka la la'yahay ah si halkaa looga akhriyo.

Xaashi, oo codsi baafin ah u soo gudbiyay Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed, wuxuu markasta dhegeystaa barnaamijkaas oo uusan marna seegin si uu u maqlo haddii war cusub la hayo. Asagoo ku dheggen raadiyo yar, ayaa wuxuu yiri: " Dhegta ayaan ku hayaa maalinkasta; sababtaas keliya ayaanna u soo ibsaday."

Inkastoo meelo badan oo Soomaaliya ka mid ah laga heli karo Internet, haddana inay qoysasku farriimahooda isu soo mariyaan Laanqayrta Cas/Bisha Cas ma aha wax laga tegey. Soomaalida ku nool xeryaha dadka barakacayaasha ee gudaha (IDP) taasi waxay u tahay waxa keliya ee ay heli karaan.

Batuulo waxay ku nooshahay xaruntii hore ee Safaaradda Boqortooyada Ingiriiska ee Muqdisho. Waxkasta oo uu qoyskeedu lahaa dagaalkii ayay uga lumeen waxayna in ka badan afar sano ku noolayd xero barakacayaal. Baatuulo waxaa 2008dii ka go'ay xiriirkii ay la lahayd saygeeda. 2012kii, waxay heshay war sheegaya inuu joogo Nairoobi oo ku taal dalka deriska la ah Soomaaliya ee Kenya. Bisha Cas ayaa ku caawintay la xiriirka saygeedii. Waxay seygeedii is dhaafsadeen fariimo loo soo mariyey Ururka Bisha Case e Soomaaliyeed iyo Laanqeyrta Case ee Kenya. Hase ahaatee, in yar kadib markii ay xiriirkooda sooceshadeen, ayaa Butuulo saygeedii xijaabtay. Batuulohadda waxay la madluunsantahay geeridii saygeeda, waxayse weli sii wadaa farriimaha qoyska oo ay u dirto dumaashigeed. Waxay leedahay:"Aad ayaan u faraxsanahay maxaayeelay waxaan isla xiriirnaa dad aan weyney waa hore."

ICRC - BBC BARNAAMIJKA RAADIYAHA EE DADKA LA LA'YAHAY

Ayadoo raadiyuhu weli yahay qaabka ugu wanaagsan oo lagula xiriiri karo Soomaali badan, Laanqayrta Cas ee Caalamiga (ICRC) iyo BBCda ayaa waxay sanooyin badan isu biirsaday inay gacan ka geystaan sidii loo heli lahaa dadka la waayey. Qoysasku waxay ICRCda iyo SRCSta u gudbiyaan magacyada eheladooda la waayey. ICRCdu waxay markaas magacyadaas u gudbisaa BBCda. Laanta Af Soomaaliga ee BBCdu waxay magacyadaas ka siiddeysaa barnaamij raadiyo oo socda 15 daqiiqadood kana baxa 5 goor toddobaadkii laga bilaabo 5:45 ilaa 6:00 galabnimo saacadda Soomaaliya. Markay qaraabadii la waysanaa maqlaan magacyadooda oo laga yeerinayo raadiyaha,waxaa u suurtogasha inay la xiriiraan ICRCda ama SRCSta si ay xiriir ula samaystaan cidda raadinaysa. 2012kii, waxaa la shaaciyey 10,000 oo magac, waxaana la helay 300 oo qof oo ay weysanaayeen eheladoodii.

RESTORING FAMILY LINKS

SOOCELINTA XIRIIRKA QOYSKA

WARAYSI LALA YEESHAY CAASHA ISMAACIIL OO AH MADAXA BARNAAMIJKA XIRIIRKA QOYSKA EE ICRC SOOMAALIYA

Caasha Ismaaciil waxay la shaqayneysey ICRCda Muddo 12 sanno ah ayadoo ahayd Madaxa Barnaamijka xiriirka Qoyska ee Soomaaliya. Ayadoo Ku sugan magaalada Nairobi, waxay in badan safarro ku tagtay Soomaaliya sanadahan. Waxay garaneysaa mutadawaciinta Bisha Cas ee Soomaaliyeed kuwaasoo ICRCdu Ku tiirsan raadraaca xubnaha qoyska.

Asha Ismael, ICRC Somalia Head of Family Links Program

Maxay ICRCdu qabata si ay u midayso qoysaska?

Ayadoo la kaashanaysa Uruka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), ICRCdu waxay tan iyo 1977kii caaawimad ka geyseneysey dib u soocelinta islaxiriirka qoysaska ee Soomaaliya. Bisha Cas ee Soomaaliyeed waxay dhammaan gobollada dalka ku leedahay 23 xafiis oo ka shaqeeya sidii dadka Soomaaliyeed looga caawimi lahaa dib u soocelinta iyo sii wadidda isla xiriirdidda eheladooda Soomaaliya iyo dunida oo dhan.

Sidee bay u shaqaysaa?

ICRC iyo SRCS waxay adeegyo kala duwan u fidiyaan dad uu ka go'ay xiriirkoodii Soomaaliya. Adeegyadaan waxaa ka mid ah:

Farriinta Qoyska eeLaanqayrta Cas/ Bisha Cas. Taasi waa warqado furan oo dadka u suurtogelineysa inay diraan akhbaarta qoyska markay ogyihiin halka ay eheladoodu joogaan, illowse hababkii dhaqameed ee ay iskula xiriiri jireen uu khalkhal galay. 2012kii, 19,000 oo Soomaali ah ayaa farriimo qoys ay isdhaafasadeen eheladooda dibedda iyo Soomaaliyaba.

Codsiyada baafinta: Kani waa adeeg caawima dadka rejeynaya inay helaan soona ceshadaan xiriirka eheladooda aanse aqoon cinwaankooda. 2012kii, 543 qof ayaa codsiyo raadraacis oo cusub u furtay eheladooda la wayesanaa, iyadoo 1370 codsi ee sanooyinkii ka horreeyey ay weli laalanyihiin. 300 oo qof ayaa raadraacistooda lagu guuleysan karaa laguna xiriirin karaa qoysaskooda. **Shabakada xiriirinta qoyska** Soomaaliyeed waxaa ku jira magacyadii laga baahiyey barnaamijka dadka la waayey ee ICRC- BBC (fadlan eeg sanduuqa ICRC-BBC), Iyo codsiyo kastoo raadraacis ah. 2012kii, ICRC waxay shabakada iskuxirka qoyska ku soo daabacday magacyo 10,000 oo dad la waysanaa, halkaasoo qof kastoo ka mid ah Soomaalida Qurbojoogta ee dunida oo dhan ay geli karaan raadsanna karaan.

Warqadaha dhoofidda: Tani waa warqad rasmi ah oo ay ICRC soo saarto kadib markay safaaradi u soo codsato dad aan lahayn warqado rasmi ah (baasaboor / warqad aqoonsi) si ay markaas ugu suurtogasho inay u dhoofaan dalkoodii hore oo ay qoysaskoodii dib isula kulamaan.

Siideebay Soomaalidu adeegyadaan uga helaan Soomaaliya?

Dalka Soomaaliya, dadku waxay adeegyada baafinta ku heli karaan ayadoo loo marayo shaqaalaha goobta ee Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed iyo shabakd Mutadawaciin ah, ama ayadoo toos loo tago xafiisyada baafinta ee dalka. Soomaalida dibeddu waxay la xiriiri karaan ICRCda ugu dhaw ama jimciyadaha waddaniga ah ee Laanqayrta Cas/Bisha Cas ee dalalka ay deggen yihiin.

QAXOOTIGA SOOMAALIYEED EE YEMEN: SARKAAL ICRCDA U QAABILSAN BAAFINTA OO NALA QAYBSANAYA XOGTIISA.

Magacaygu waa Maxamed Xirsi. Waxaan ahay sarkaalka goobta oo ICRCda u qaabilsan baafinta... Waxaa kaloo aan ahay odey Soomaaliyeed ee jaaliyaddayadeena ku dhaqan Sanca. Waxaan ka mid ahaa kuwii ugu horreeyey ee halkaan yimid waxaana Yemen ku noolaa waqti dheer, ku dhawaad 30 sano.

Jaaliyadda Soomaaliyeed waxay u mahad naqaysaa ICRCda Yaman maadaama ay ka mid tahay hay'adihii samafalka ee ugu horreeyey ee Sanca oo ku taakuleeyay jaaliyadda Soomaaliyeed inay sameystaan xarun.

Oday ahaan waa wax caadi ii ah inaan caawimo jaaliyadda Soomaaliyeed iyo inaan fududeeyo xiriirrada kala dhexeeya dalka martigeliyey ee xagga arrimaha ay ka mid yihiinihiin waxbarashada,caafimaadka iyo socdaalka.

Waqtiga aan firaaqada leeyahay, xubnaha kale ee jaaliyadda Soomaaliyeed iyo aniguba waxaan ku dadaalnaa inaan ka wada shaqayno sidii loo dabooli lahaa baahida dadka aadka u nugul sida waayeelka, carruurta, da' yarta keli socotada ah, haweenka laga dhintay,iyo naafada ku dhexnool qaxootiga magaalojoogta ah. Khaas ahaan ama aqoonyahan ahaanba marwalba waan ka warqabaa jaaliyadda Soomaaliyeed si aan ugu xiriiriyo qaraabadooda ay jecel yihiin ay kala go'een dagaalkii Soomaaliya awgeed.

Bacdamaa aan ahay sarkaalka goobta oo ICRCda u qaabilsan baafinta, waxaan ku dadaalaa inaan mideeyo qoysaska kala go'ay, waxaana aan uruuriyaa xog caawimaysa xallinta xaaladaha la raadraacayo taasoo dadka Soomaalida u dhashay ee Soomaaliya iyo kuwa dunida oo dhan u suurtogelineysa inay helaan eheladooda jooga Yaman. Waxaan la hadalnaa odayaasha jooga dhammaan gobollada Yaman si ay noola soo xiriiraan ayna liisaska raadraacista ugu gudbiyaan qabiilooyinkooda iyo xubnaha beelohooda.

Qaabkaas ayay noola soo xiriiraan kadibna nagu soo wargeliyaan wixii ay heleen.

KOONFUR AFRIKA: ISKU XIRKA QOYSKA AYAA ISKU HAYA JAALIYADDA SOOMAALIYEED

Qaxootiga Soomaaliyeed waxay bilaabeen inay degaan Koofurta Afrika bilowgii 1990maadkiidagaalkii sokeeye awgiis. Iyadoo ayan dawlad dhexe dalkoodii ka jirin, Koofurta Afrika kuma ayan lahayn wax ergo diblomaasiyadeed ah. Saa darteed, Ururka Soomaaliyeed ee Koofurta Afrika (SASA) waxaa loo asaasay baahi loo qabay in cod loo yeelo tirada soo kordheysey ee qqaxootiga soo degey Koofurta Afrika. Hadda SASA waa ururka ugu qaddiimsan uguna ballaaran ee jaaliyad muhaajiriin oo ka jira Koofurta Afrika

Imraan Maxamed Cali wuxuu ku dhii-rigelinayaa Soomaalida inay isticmaalaan adeega isku xirka qoyska.

Mr Amiin Salad, agaasimaha SASA ee dalka oo dhan wuxuu leeyahay inay Koofurta Afrika ku noolyihiin qiyaastii 70000 oo isugu jira qaxooti Soomaaliyeed, magangelyo siyaasadeed dooneyaal.iyo muhaajiriin aan waraaqo rasmi ah haysan. Kuwaas oo badidood ay kala go'een deriskoodii, qoyskoodii, Iyo eheladoodii intii uu socdey dagaalkii sokeeye ee bilowday 1991kii.

" Tiro dad badan oo uu xiriirkii qoysaskoodu ka lumay ayaa dib la isugu xiray, kaasoo suura galiyey barnaamijkayaga Islaxiriirka Qoyska oo ay taageeraan Laanqayrta Cas ee Koofurta Afrika iyo ICRC. Waxaan xusuusta dhawr xaaladood oo lagu guuleystey halkaan Koofurta Afrika annaguna qayb baan ka qaadannay dadkaas soo heliddooda iyo isugu keeniddooda Koofurta Afrika, " ayuu yiri.

Mutuadawac SASA horena u ahaa mutadawac Ururka Bisha Case e Soomaaliyeed, Cimraan Maxamed Cali, wuxuu sheegay inuu Soomaalida Ku dhiirrigeliyo inay isticmaalaan adeegga Iskuxirka Qoysaka sida uu aabbihiis yeelay Markii ay kala go'een walaalkiis waagii uu Socdey dagaalkii sokeeye ee 1991dii. Iyadoo loo marayo Qaybta Caalamka ee BBCda iyo iyo Bisha Case e Soomaaliya dib u kulmeen 2005tii inkastoo adeerkii degey Itoobiya. Hadda waxay isula xiriiraan si joogta ah Cimraanna wuu u mahadanaqayaa barnaamijka, "ma aha qoyskayga keliya ,"ayuu leeyahay "ee waa dunida oo idil, gargaarka aadaminnimo ee ay Laanqayrta Cas bixiso gaar ahaanna barnaamijka iskuxirka qoysku waa mid aad muhiim u ah."

NOLOSHA XERO QAXOOTIGA EE KENYA

Yaasamiin waxay ku dhalatay Muqdishow. Waxay aragtay sida ay magaaladu u sii kharrribmaysey intii waayo ah iyadoo uu dagaalku saameeyey. Setember 2010kii, waxay xaaladdu gaartey meel khatar ah aan loo adkaysan karin. Saygeedii wuxuu u sheegay inay jirto xero uu dadku ku nabadgalo, sidaa darted markii ay gaareen go'aan ay Kenya ugu cararaan, deegaan nabad ah ayaa ahaa waxaa keliya ee ay raadinayeen. Nasiibdarro way u suurtoobi weysey inay kaxaysato qoyska intiisa kale.

Yaasamiin, oo markaas 19 jir keliya ahayd, iyo saygeedii waxay yimaaddeen xerada Qaxootiga ee Dhadhaab oo wax yar u jirta xuduudda Kenya. Maalin kastoo dhalata waxaa soo galayey dad dheeraad ah illowse kuwii ka yimid deegaankeeda uma hayn war sheegaya halka uu qoyskeedii ku sugan yahay. Saasoo ay tahay, galab baa, waxay la kulantay qof deriskeeda ahaa oo Muqdisho ka yimid, oo u sheegay in waalidiinteedii ay ku dhinteen banbo ku qarxday daar gurigooda u dhaw.

Mar haddii ayan haysan wax ay Soomaaliya, dib ugu noqoto, Yaasmiin,,waxay bilowday inay raadsato sidii ay dal kale ugu guuri lahayd. Ayada iyo saygeedii waxay go'aansadeen inay aadaan xerada qaxootiga ee Kakuma bishii Setembar 2012dii, halkaas oo ay rejeynayeen inay helaan Nasiibkooda mid ka sii wanaagsan.

Caloolxumo, bil kadib ayaa saygeedii furay. In kastoo ay caqabado badan soo wajeheen, maalintii aan Kakuma kula kulmay, farxaan bay ahayd. Adeegga telefoonka mobaaylka ee Laanqayrta Cas/ Bisha Cas wuxuu u suurtogeliyey Inay la xiriirto saaxiib yaraanteedii oo asna u cararay Koofurta Afrika; qofka keliya oo uga haray dhallinyaradeedii Muqdisho oo ay xiriiri la yeelan karto.

ayaga iyo kuwo kale oo sidooda ka faa'iideysta adeegga telefonka mobaaylka, waxay si xiiso leh u sugtaa soo yeerista xigta. La xiriirka kuwa la jecelyahay wuxuu rejo u yahay kuwa waxkastoo kale ay ka lumeen

Haween yar oo Soomali ah ee ku jirta xerada qaxootiga ee Dhadhaab waxay telefoon u direysaa qoyskeeda

Summary of all ICRC Interventions in 2012

ICRC



WAAJIBAAD SHAQO

ee Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas (ICRC) waa urur aan eexan, madaxbanaan dhex dhexaadna ah kaasoo howshiisa aadaninimo kaliya tahay inuu dhowro nolasha iyo sharafta dhibanayaasha dagaalada iyo xaaladaha kale ee qalalaase iyo inuu siiyo gargaar dhibanayaasha collaadaha. ICRC-da waxay kaloo ku dadaashaa inay ka hortagto dhibaatada iyadoo horumarinaysa xoojinaysana xeerka aadaninimada iyo mabaadiida caalamiga ee aadaninimada. Iyadoo la aasaasay sanadkii 1863dii, ICRC-du waa asalka Axdiyada Jeneefa iyo Dhaqdhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas. Waxay jihaysaa ayna isku dubaridaa howlaha caalamiga ah oo ay qabato Dhaqdhaqaaqa xiliyada colaadaha iyo xaaladaha kale ee qalalaasaha.

ICRC
International Committee of the Red Cross

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi - Kenya
www.icrc.org

© ICRC, January 2013

Photo cover: Yazdi Pedram/ICRC

2013.0026/002